

Wadahadalka ku saabsan kirada cusub ayaa la hakiyey.

Ururka kireystayaasha iyo guri kireeyahaaga ayaa wada gorgortan ka dib awoodi waayay inay kirada cusub ee 2021 ku heshiyaan. Inkasta oo ay taasi jirto ayuu hadda guri kireeyahaagu ku wargalinayaa in kirada la kiciiy, ama waxaad heli doontaa uun warqada kirada oo ay kirada la kordhiyay ku daabacan tahay. Tan micnaheeda ma aha inay waajib kugu tahay inaad kiradaas cusub aqbasho. Annaga oo ah Ururka Kireystayaasha waxaanu kugula talineynaa inaad qadarkii ay kiradaada hore aheyd aad sii waddo inaad bixiso.

Haddii aanad adiga kireysteha ahi aqbalin kordhintaa waa in guri kireeyahaagu uu u tagaa guddida dhedhexaadinta iyo jaangoynatira kirada guryaha si uu ugu helo go'aan uu kirada ku kordhinaayo. Waaanu guddida dhedhexaadinta iyo jaangoynatira kirada guryaha hortooda adiga kuu noqon karnaa wakiil iyadoo aanu kuu hadli karno. Kirada cusubi waxay dhaqan gel kartaa ugu horeyn saddex bilood ka dib marka uu guri kireeyahu uu dacwadiisa soo gudbiyo. Sidaas darteed ayaanay kuugu dhici karin inaad kirada la kordhiyay ee la soo dhaafay aad dib u bixiso saddexda bilood ee ugu horreeya. Waxaan sidoo kale lagaa cayrin karin gurigaaga ama lagu galin karin inkasso, ilaa iyo inta aad sii waddo inaad wakhti ku bixiso kiradii hore.

Nala soo xiriir haddii ay kuu wacaan guddida dhedhexaadinta iyo jaangoynatira kirada guryaha markaas ayaanu ku caawin doonaa. Caawimadaasi waxay ka qeyb tahay xubinnimadaada aad ku jirto Ururka Kireystayaasha.

Miyaad rabtaa inaad ka qeybqaadato gorgortanka kirada?

Marka gorgortanka la sameynaayo ayay muhiim tahay in aqoon fiican oo guriga ku saabsan la leeyahay iyadoo aan xogtaasna ka helno ergooyinkayada gorgortanka ka qeybqaadanaaya ama wakiillada guryaha kuwaas oo ah xubno degga/ku nool guriga. Waaanu u baahan nahay inaanu ka sii tiro badano, miyaad adigu xiisaynaysaa inaad noqoto ergo gorgortan gasha ama wakiil guri, boggayaga ka akhri wax dheeraad oo hawsha ku saabsan iyo sida la isku doorto
<https://www.hyresgastforeningen.se/om-oss/vad-vi-gor/hyresforhandling/hur-du-deltar-i-hyresforhandlingar/>

Miyaad su'aalo qabtaa?

Waxaad bogayaga internetka www.hyresgastforeningen.se/hyreshojning aad ka helaysaa maclumaad dheeraad ah oo aad fariin noogu soo diri kartaa. Haddii aad wax su'aalo ah oo ku saabsan gorgortanka qabto ayaad ku soo dhawaan kartaa inaad nala soo xiriirto. Waxaad Xaruntayada Adeegga kala xiriireysaa 0771-443 443. Waxay xarunta adeegu furan tahay isniin ilaa khamiis 08:30-16:30 iyo jimce 08:00-16:00.

Maareynta xogta shaqsiga

Waxaad bogayaga internetka ee <https://www.hyresgastforeningen.se/om-oss/dina-personuppgifter/sa-behandlar-vi-personuppgifter/> ka heli kartaa maclumaad ku saabsan sida Ururka Kireystayaashu uu u maareeyo xogtaada shaqsi ahaaneed.